HARUNTA TAAKULEYNTA ARRIMAHA KU SAABSAN SHARCIYADA XUQUUQDA AADANAHA

Warqadda Warbixinta #1aad
Oktoobar 2009

QODOBKA XUQUUQDA AADANAHA U DEGSAN ONTARIO QEYBTIISA KU AADAN XAQA AAD U LEEDAHAY IN LAGU TIXGELIYO

Warbixintan waa mid guud oo keli ah. Ma ahan talo ku saabsan arrintaada gaarka ah. Warbixintan ma ahan mid lagu beddeli karo baarista, falanqeynta iyo figkradaha uu soo jeediyo qareenka.

Hordhac

Marka dhinaca xuquuqda aadanaha laga eego, ereyga ***tixgelin*** waxaa la isticmaalaa marka la tilmaamaayo xilka saaran madaxda shaqada, adeeg fidiyaha ama milkiilaha guriga si uu u xaq-sooro dadka uu qeexayo Q*odobkan Xuquuqda Aadanaha* ee u degsan gobolka Ontario. Tusaale ahaan, dadkan la tilmaamay waxaa ka mid ah dadka naafada ah, waayeelka iyo dhallinyarada, dadka ka soo jeeda bulshooyinka la midab-sooco, qoysaska, waalidka caruurta kaligood korsada, dadka mardhow waddanka soo galay, iyo dhamaan dadka *Qodobkan Xuquuqda Aadanaha* ee Ontario u degsan uu u aqoonsado in ay yihiin dad la midab takooray.

Qodobkan tixgelinta dadka wuxuu rumeysan yahay in dadku ay qabaan baahi kala duwan sidaas darted wax ka qabadkooduna uu kala duwan yahay si ay u helaan adeeg, guri iyo shaqo. Si qof tixgelin loo siiyo macnaheedu waxay tahay in laga qaado caqabadaha ka hortaagan sida uu ku heli lahaa shaqo, guri uu dego, iyo adeegyada shacabka loo fidiyo oo dhan (sida, gaadiidka shacabka ama iskuulaadka).

Haddii aad ka mid tahay dadka uu *Qodobkan* tilmaamay, la soco in waajibka saaran madaxa shaqada, adeeg fidiyaha ama milkiilaha guriga uu yahay in ay wax ka bedelaan habka shaqada loo fuliyo, adeegyada loo fidiyo ama guryaha loo bixiyo (tusaale ahaan, dhismaha in wax laga beddelo ama habka iyo shuruucda shaqada wax laga beddelo) si ay adigu kuugu sahlanaato ka qeyb qaadashada shaqada, helidda adeegyada ama guryahaba.

Baahida tixgelin mudan maxaa ka mid ah?

Waajibka ku aadan tixgelinta dadka, meelo badan ayuu ka imaan karaa ayadoo intaba laga eegaayo qofka naafanimadiisa, da'diisa, diintiisa, guurkiisa, Sharciga uu waddanka ku joogo, qoladda ama jinsiyadda uu ka soo jeedo, ama haddii xil qoos saaranyahay ama arrimo kale oo ku xusan *Qodobkan*.

Badanaa, waajibka ah in dadka la tixgeliyo wuxuu aad u khuseeyaa goobaha shaqada, halkaas oo qofka shaqaalaha ah uu xilkiisa shaqada uu u gudan waayo sidii hore looga bartay, kaasoo sababay dhaawac, cudur ama qabatin uga yimid shaqada uu hayay markaas. Inkastoo qofka shaqaalaha ah uusan sidii hore u fulin karin shaqadiisa, haddana madaxa shaqada ma ceyrin karo qofkan, asaga oo marka hore la siinin fursad uu ku caafimaado ama aan loo fidinin shaqo tii hore ka duwan.

Tixgelinta isku si miyey dadka u wada saameeysaa?

Maya. Si kala duwan ayey dadka u saameysaa tixgelinta, xitaa haddii ay isku dhibaato wada qabaan. Tusaale ahaan, laba ruux oo qaba xanuunka maskaxda ku dhaca "Multiple Sclerosis (MS)". Madaxa shaqada ma dhihi karo, "Oh, marka ay Maryan qabtay xanuunka MS waxa ay u baahatay oo keli ah in la siiyo 15 daqiiqo oo fasax dheeraad ah maalin walba, sidaa darteed Joon na intaa oo kale ayuu xaq u leeyahay." Nooca tixgelinta loo baahanyahay waa kala duwantahay waxeeyna ku saleysan tahay baahidaada gaarka ah, baahidaasna waa in la tixgeliyaa, la qiimeeyaa kaddibna si gaar ah loo hirgeliyaa.

Maxaa ka mid ah waxyaabaha qofka loo tixgelin karo?

Waxyaabaha qofka loo tixgelin karo waxay ku xiranyihiin baahida gaarka ah uu qofka qabo. Tusaale ahaan waxyaabaha tixgelin la siin karo waxaa ka mid ah:

- dhisidda irrid ama waddo yar oo dadka naafada ah ee kursiga ku socdo ay ka soo galaan xaafadda/xafiiska;
- tixgelin gaar ah in la siiyo waqtiyada shaqadana looga dhigo waqti qofka ku haboon ama fasaxyo gaaban la siiyo;
- dadka dhegaha la' oo loo keeno ruux u fasiro wada hadallada si ayaguna ay uga qeyb galaan shirarka;
- shaqada oo ruuxa dib loogu habeeyo, dib loo tababaro ama shaqo kale loo dhiibo;

- in loo ogolaado in xijaabkiisa uu xiran karo qofka xitaa haddii maamulaha shaqada uu rabo in shaqaalaha oo idil ay hal nooc oo labis ah ku wada shaqeeyaan;
- ruuxa uurka leh oo loo ogolaado aadida ballamada takhtarka ama
- In qofka loo ogolaado in uusan shaqeynin ciidaha u gaarka ah.

Sideen u heli karaa tixgelinta aan u baahanahay?

Si aad u hesho mudnaanta iyo tixgelinta aad u baahantahay, waa in aad qaadaa tallaabooyin qaarkood. Waa in aad:

- weydiisataa in baahidaada la tixgeliyo;
- fasirtaa sababta aad ugu baahantahay (isku day in aad qoraal ku keento);
- soo gudbisaa warbixin ku saabsan baahidaada, dhibka aad qabto ama awaood xumada aad sheeganeysid (waxaad soo raacin kartaa warqadaha caafimaadka, kuwa ku saabsan dhibka shaqada ka imaan kara oo keli ah oo aad u weydiisaneysid tixgelin gaar ah);
- ka qeyb gashaa wada hadallada ku saabsan sida laguu tixgelin lahaa;
- soo dhoweyso talooyinka cid alla cidii waayo aragnimo u leh baahidaada; iyo
- isku daydo in aad tixgeliso isbedellada laguu soo bandhigo xitaa haddii aysan ahayn sida aad rabi lahayd

Haddii aad xubin ka tahay ururka shaqaalaha, waxaa kuu wanaagsan in aad la kulantaa xubinta wakiilka kaa ah maxaa yeelay ruuxaas wuxuu ku siin karaa talooyin ku saabsan sida aad u heli kartid tixgelintaada.

Muxuu qaban doonaa madaxa shaqada, milkiilaha guriga ama adeeg fidiyaha kolka aan u soo gudbiyo codsigeyga tixgelinta ku saabsan?

Marka aad codsigaada tixgelinta ku saabsan soo gudbiso, madaxa shaqada, adeeg fidiyaha ama milkiilaha guriga waa in uu:

- si daacad ah u tixgeliyaa codsigaada, hadii aysan jiri wax sharci ah ee diidaaya codsigaada in la tixgeliyo;
- fahmaa in dadka qaarkood aysan aqoon isticmaalka ereyga “tixgelin” kolka ay rabaan in mudnaan la siiyo baahida ay qabaan;

- fikrad iyo talo weydiisto qof khibrad u leh arrinta haddii loo baahdo;
- si fir fircooni ah u raadiyo fikrado kala duwan;
- codsigaada iyo tallaabada laga qaaday uu nuqul ka reebaa;
- arrinta sir ahaan u qaabilo;
- warbixinta uu kaa codsanaayo ay ahaato mid kooban oo ku saabsan baahida aad qabtid, dhibka ku haysto iyo awood xumadaada (sida, waraaqaha caafimaadka);
- muddo gaaban ku tixgeliyaa codsigaada;
- bixiyo kharashka qoraalada iyo warbixinnada takhaatiirta;
- tixgelintaada hadddii ay "**dhib weyn**" (waxa loola jeedo hoos ka fiiri) ku tahay maamulka, sida kharash badan ay u baahantahay, waan in si cad loo tilmaamo, fasiraad fiicanna laga bixiyo sababta aan loo tixgelin karin codsigaada.

Ilaa xadkee qofka codsigiisa la tixgelin karaa?

Tixgelinta codsiga qofka xad u goan ma laha. Xadka aan la dhaafi karin waa marka arrinta ay noqoto ***dhib weyn***. Madaxa shaqada, milkiilaha guriga ama adeeg fidiyaha kuma qasbana in uu mudnaan siiyo codsiga qofka haddii ay taas dhib weyn ku tahay shaqada ama adeega.

Maxaa loola jeedaa "dhib weyn"?

Qodobkan wuxuu culays weyn saarayaa qofka laga rabo in uu xilkan tixgelinta ah fuliyo, tusaale ahaan madaxa shaqada waxaa laga rabaa in uu inta awoodiisa tahay uu tixgelin siiyo baahida uu qabo qofkan dhibban. Madaxa shaqada waa in uu:

- qaadaa tallaabo kasta oo wax loogu qabanaayo qofkan dhibban ayada oo aanan dhib weyn loo geysaneyn xarunta shaqada; ama

- muujiyo in uusan tixgelin karin baahida qofkan ayadoo aanan dhibaato weyn loo geysan xarunta shaqada.

Ulajeedada ugu weyn waxay tahay in qofka dhibban tixgelin la siiyo ayada oo aanan dhibaato weyn loo geysan xarunta shaqada, milkiilaha guriga ama adeeg fidiyaha. Taa macnaheeda waxay tahay si qofka dhiban loo tixgeliyo waa in loo dulqaataa inta la awoodi karo.

Tusaale ahaan, madaxa shaqada, milkiilaha guriga ama adeeg fidiyaha ma dhihi karo "dhib weyn" ayey igu tahay in aan dhiso musqul dadka naafada ha ay isticmaali karaan maxaa yeelay waa igu qaali. Waxaa hubaal ah in tixgelinta

qaarkood ay u baahantahay kharash saa'id ah. Si loogu doodo tixgelinta in ay dhib weyn ku tahay xarunta shaqada, madaxa shaqada waa in uu la yimaadaa caddeyn muujinaysa in kharashkan uu dhib u keenayo hab socodka xarunta shaqada.

Sidoo kale, waxyaabaha kala ah sida dhibaatooyinka, naceybka ama gardarooyinka ee kaaga imaanaaya shaqaalaha, waxqabdka heshiiska iskaashigan shaqaalaha ama "rabitaanka" macaamiisha, kama mid aha waxyaaba la texgelinta mudan.

Maxaa mudnaanta la siinayaa haddii qofku uu dhib weyn sheegto?

Haddii madaxa shaqada, adeeg fidiyaha ama milkiilaha guriga uu ku doodo in dhibaato weyn ay soo gaareyso, Maxkamaddu waxay tixgelinaysaa oo keli ah haddii kharashkaasi uu aad u fara badanyahay (oo madaxa shaqada, adeeg fidiyaha ama milkiilaha guriga ku qasabta in uu meel kale lagac ka doonto) iyo/ama haddii arrintu ay keeneyso dhibaato caafimaad ama nabad gelyo xumo.

Ka fiiri arrintan *Qodobka Xuquuqda Aadanaha* ee Ontario, khaasatan qeybta 11(2) iyo17(2).
Waxaad nuqul ka heli kartaa shabakadda dowladda sharciyadeeda lagu soo saaro oo ah Human Rights Code.

Halkeen faah-faahin dheeraad ah ka helayaa?

MAXKAMADDA XUQUUQDA AADANAHA EE ONTARIO

La xiriir **Maxkamadda Xuquuqda Aadanaha ee Ontario** si aad u hesho **foomka lagu codsado** xadgudubka midab-takoornimada**.** Waxaad kaloo fiirin kartaa shabakadda Human Rights Tribunal si aad u hesho nuqulka Tilmaamayo sida loo buuxin karo foomka codsiga iyo warbixinno ku saabsan habka Maxkamadda, shuruudaheeda iyo maamulkeeda.

Human Rights Tribunal of Ontario
655 Bay Street, 14th floor
Toronto, ON M7A 2A3
Local : (416) 326-1312
Toll Free : 1-866-598-0322
TTY (Local): (416) 326-2027
TTY (Toll Free): 1-866-607-1240
Fax: (416) 326-2199
Fax (Toll Free): 1-866-355-6099
Shabakadda Human Rights Tribunal ee Ontario.

HARUNTA TAAKULEYNTA ARRIMAHA KU SAABSAN SHARCIYADA XUQUUQDA AADANAHA

La xiriir **Harunta Taakuleynta Arrimaha ku saabsan Sharciyada Xuquuqda aadanaha** haddii ay kula tahay in lagu midab-takooray aadna u baahantahay in ruux sharci yaqaan ah kaa caawiyo sida loo buuxiyo warqadda codsiga Maxkamadda ama talo ku beegan sida aad u jahayn laheyd midab-takooridda lagugu sameeyey.

Talaabada ugu horeyso waxay tahay in aad soo wacdo khadka telefoonkeena ee lagu fidiyo warbixinnada/talooyinka:

Human Rights Legal Support Centre
Tel: (416) 314-6266
Toll Free: 1-866—625-5179
TTY: (416) 314-6651
TTY Toll Free: 1-866 612-8627
Shabakadda Human Rights Legal Support Centre.

GUDDOONKA XUQUUQDA AADANAHA EE ONTARIO

Waxaad kaloo la xiriiri kartaa Guddoonka Xuquuqda Aadanaha ee Ontario. Shabakadooda warbixinno badan oo ku saabsan *Qodobka Xuquuqda Aadanaha* ayey ku soo bandhigaan.
Shabakadda Ontario Human Rights Commission.

Waxaad fiirin kartaa shabakadda dowladda sharciyadeeda lagu soo saaro oo ah Human Rights Code.